

KOR UGU AKHRI CUNUGAAGA

Caruurga waxee jecelyahiin in kor loogu aqriyo oo ay maqlaan sheeko wanaagsan. Wuxuu isticmaali kartaa qorshaha ah Kohor-Markaas-Kadib markaad kor ugu aqrineesid. Sidaas ayaa kusoo gelin kartaa cunuga akhriska, kadib isaga ama iyada wuxuu baranayaa erayo cusub.

KOHOR

Buuga la fiiri cunugaaga. Waa maxay buuga magaciisa? Kala hadal wuxuu ka hadlaayo buuga. La fiiri sawirada kalana hadal waxa aad aragto.

MARKAAS

U ogolow cunugaaga inuu kaa suaalo buuga wuxuu ka hadlaayo iyo erayada ku adag intaad ku guda jirtid akhriska. Sidoo kale waydii su'aala furan: "Sabab aye gabadha sidaas u tiri?", "Maxaad u maleeysa inuu hada dhici doono? Iwm.

KA DIB

Kala hadal waxa uu buuga ku saabsan yahay. Markala sawirada isla fiiriya una ogalaaw inuu sheekada ku celiyo. Weydii cunugaaga waxa ugu qosolka badnaa, waxa ugu cabsi badnaa iyo waxa ugu xiiso badnaa sheekada. Hadaad doontaan isla daawada xarfaha, kalana hadal xarfahaa waxa loogu yeero, sida ee u egyahiin iyo sida loogu dhawaaqo.

FIKRADO KALE OO FICAN




Bogga "READ – isla wada aqrinta" waxaad ka heli kartaa fikrado oo ku saabsan sida aad ugu akhrin lahayd cunugaaga. Filmka wuxuu ku baxaa luuqado badan.

www.aarhus.dk/read

ISTICMAAL LUUQADA!

FAYLKAAN WUXUU KU SOCDAAN WAALIDIINTA
OO CIYAALE U DHIGTAAN FASALADA CARUURTA



Faylkaan waxaad ka akhrisan kartaa adigoo gurigaaga jooga si aad cunugaaga uga caawin karto hormarinta luuqadiisa sida ugu macaquelisan.

MUHIIM AYAAD U TAHAY CUNUGAAGA LUUQADIISA

Waalid ahaan waxaad tahay qofka ugu muhiimsan dhanka xiriirka cunugaaga luuqadiisa inuu hor mariyo iyo cunugaaga inuu ka helo wax barashada.

Si wadajir ah skoolka waxaa u sameeneesin xaalada ugu fiican cunugaaga.

Luuqada waxaad ku baran kartaa inaad isticmaasho sida ugu badan, iyo waxa aad markasta ku caawin kartaa cunugaaga si uu luuqadiisa u hormariyo maalin walbo.

Isticmaal luuqadaha aad awoodi kartit oo aad u dareemeysid inaad ugu roontahay – markaad kula hadleesid cunugaaga, iyo markaad u akhrineesid ama aad u sheekeyneesid.

LA HADAL, LA CIYAAR, LA HEES, LA AQRI

Waxaa jira wax yaabo badan oo aad ku caawin kartid cunugaaga luuqadisa si uu u hormariyo:

- Kala hadla waxyina, fikradiiina iyo dareemahiina.
- Kala hadal waxaad la kulante iyo waxaad la kulmi doontiin.
- Waydii cunugaaga fikradiisa, adigana u sheeg fikradahaada.
- La hees, lana ciyaar cunugaaga.
- U akhri cunugaaga maalin walba, kalana hadal waxa aad u akhrise, lana fiiri sawirada.
- Sidoo kale waxaad u sheegi kartaa sheekoojin, tusaale ahaan caruurnimadaada ku saabsan.

*"Ma xasuusataa markaan ayeeyo
iyo awoowe booqane fasax jiilaalka.
Waynu booqan donaa fasaxa xiga
ee jiilaalka"*



*Halkaan waad
ka daawan kartaa filmka*
**"Luuqada waa hadiyad ka
timid aabo iyo hooyo"**
oo ka hadlaayo sida cumugaaga aad
uga caawin kartid luuqada nolol
maalmeedka. Filmkaan waxaad heli
kartaa asigoo luuqado badan
lagu turjumey.
www.ltk.dk/sprog-er-en-gave

U ISTICMAAL ERAYO NOLOL MAALMEEDKA

Luuqada waxaad ku baran kartaa inaad maalin walba isticmaashid. Ka hadla wax yaabaha aad isla sameeyneesii: Markaad wax iibsaneesaan, dharka gasheyneesin, miiska cuntada aad diyaarineesin, cuntada sameyneesii, luga baxsi aad aadeesiin iwm.

*"Masoo qaadi kartaa alaabta?
Waxaan ubaahanahay fargeeto
iyo mindi."*



*"Hada waxaan soo iibsaney
caano iyo subag. Waxaan sidoo
kale u bahanahay khudaar.
Ma soo qaadi kartaa 5 yaanyo?"*

Ciyalka waxay la kulmaan erayo badan nolol maalmeedkooda sidaas ayee ku bartaan erayo badan. U isticmaal erayo wax walba aad la sameyneesid cunugaaga:

"Hadda waxaan kuu xiraaya kabahaaga, lugta midig ma dhex gelin kartaa kabta?"

"Hada waxaan diyaarineena boorsadada ee iskuulka, ma keensan kartaa cuntadaada?" iwm.

KALA HADAL WAXA KA SOCDA ISKOOLKA

Tusi cunugaga inaad rabtid oo aad maqasho waxa ka dhacayo iskoolka. Weeydi tusaale ahaan:

- Sidee maktabadda ahayd maanta?
- Miyaad soo amaahtay buug xiiso leh? Maxaad u soo amaahtey? Ma arki karaa?
- Yaad la cayaartay – maxaad ciyaarteen?
- Miyaad maqashey sheeko xiiso leh skoolka manta? Maxaa ugu fiicnaa?
- Isla waqtigaas cunugaaga iskoolka waxaa lagu baraa tababarka wada hadalka. Waxaa laga yaabaa inuu rabo oo uu kaaga sheekeyeo waxa ay ka hadleen.

